

Siyaasadda Guddiga S-10: Lacagaha Iskuulka ee Ardayga iyo Lacag Ka Dhaafidda



TIXRAACYO

[Habraciyada Maamul ee Siyaasadda Guddiga S-10:](#)

[Xeerka Utah Ann. §53G-8-212, Burburinta ama Halleynta Hantida Iskuulka – Mas'uuliyadda Ardayga](#)

[Xeerka Utah Ann. §§53G-7-503-505, Lacagta Iskuulka ee Ardayga, Dhigaalka, iyo Khidmadaha](#)

[Xeerka Maamulka Utah ee R277-407, Lacagaha Iskuulka](#)

SIYAASADDA

Guddiga Waxbarashada ee Degmada Dugsiga ee Magaalada Salt Lake ayaa hubiya in waxbarasho bilaash ahi ay helaan dhammaan ardayda dhigata fasallada K-6. Ardayda dhigata fasallada 7-12, guddiga ayaa aqoonsan baahida loo qabo lacagaha iskuulka ee ardayga si loogu maalgeliyo qaar ka mid ah barnaamijyada, waxqabadyada, iyo koorsooyinka iskuulka, balse waxaa ka go'an yareynta saameynta maaliyadeed ee lacagaha iskuulka ee ardayga ay ku yeeshaan qoysaska. Marka ardayga lagu soo dalacayo lacagaha iskuulka, ujeeddada laga leeyahay waa in iskuullada laga caawiyo in ay kharashaadka helaan iyagga oo aan wax faa'iido ah ka dheefin. Dadaal kasta waa in la sameeyaa si lacagaha ardayga loo yareeyo. Sannad kasta, daweynuhu waxay haystaan laba fursadood oo ay ugu faaloodaan jadwalka lacagaha iskuulka ee la soo jeediyay ka hor inta aysan oggolaan oo aysanna ansixin guddiga. Degmada ayaa u qaadan doonta una hirgelin doonta habraciyada lacagaha iskuulka, ka dhaafidda lacagaha, iyo lacag-celintaba si waafaqsan sharciga gobolka iyo siyaasaddan.

Ujeeddada siyaasaddan laga leeyahay ayaa ah oggolaanshaha dhisidda iyo maareynta nidaamsan ee nidaamka lacagaha iskuulka oo caqligal ah, si ogeysiis sannadle ah loo siiyo ardayda iyo waalidiintooda/mas'uuliyiintooda oo ku saabsan habraciyada ka dhaafidda lacagaha iyo jadwalka lacagaha ee uu guddiga ansixiyay, iyo in la mamnuuco habdhaqannada ka reebaya ardayda aan awoodin in ay bixiyaan lacagaha ka-qaybgalka waxqabadyada uu iskuulku taabogeliyay ama in culeys la saaro ardayga ama qoyskiisa oo saameyn ku yeellan kara ka-qaybgalka.

Degmadu waxaa ay dejin doontaa habraciyadeedda gaarka ah ee loogu talagalay hirgelinta siyaasaddan guddiga iyada oo loo marayo [habraciyada maamulka ee la socda](#).

S-10-Policy_SOMALI 2020-6-9

Ma jiro shaqaale degmo ama arday loo geysan kara takoor shaqaaleyn ama barnaamij ama waxqabad kasta ee degmada iyada oo lagu saleynayo da'da, midabka, naafonimada, jinsiga, aqoonsiga jinsiga, macluumaadka hiddo-wadayaasha, asalka dhallashada, uurka, sinjiga, diinta, lab ama dheddig, jihada galmada, ama xaalado halyeey dagaal hore ee qofka. Degmadu waxaa ka go'an in ay bixiso fursad adeeg iyo helid loo siman yahay oo ku saabsan barnaamijyadeeda, adeegyada iyo shaqaalaynta ay ka mid tahay siyaasadaheeda, hawlaha cabashada, helidda barnaamijka, isticmaalka xarunta degmada, guryo iyo arrimaha kale ee Fursadda Shaqaalaynta loo Siman Yahay. Degmada ayaa sidoo kale bixisa helidda loo siman yahay ee tas-hiilaadyada loogu talagalay dhammaan kooxaha dhallinyarada ah ee lagu qoray Madaxa 36aad ee Xeerka Dalka Maraykanka, oo ay ka mid yihiin kooxaha indha-indhaynta. Qofta soo socota ayaa loo xilsaaray in ay qabato su'aalaha iyo cabashooyinka ku saabsan takoorka aan sharciga ahayn, dhibaataaynta, iyo aar-gudashada: Tina Hatch, U hoggaansamidda iyo Baaritaannada, 440 East 100 South, Salt Lake City, Utah 84111, (801) 578-8388. Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa Xafiiska Xuquuqaha Rayidka, Denver, CO, (303) 844-5695.